LIISKA QODOBADA KU NOQOSHADA DHISMAYAASHA BPS

DIIWAANGELINTA

Isdiiwaangalintu waa mid joogto u socota. Sidaas oo kale, qoysaska cusub iyo kuwa ku soo noqonaya Dugsiyada Dadweynaha Degmada Buffalo wali waxay ku diiwaangelin karaan carruurtooda sanad-dugsiyeedka 2020-2021. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo https://www.buffaloschools.org/Registration

TUSAALAHA KU NOQOSHADA WAXBARISTA SHAQSI-AHAANEED

Degmadu waxay qorsheynaysaa inay ku soo dhoweyso kooxaxa ardayda horay loo go'aamiyay dib ugu noqoshada dhismayaasha dugsiyada ee xilliga labaad ee natiijo bixinta (second marking period). Koox kasta ee maamul dhisme-dugsiyeed ah, oo ay weheliyaan Kooxohooda Hoggaaminta Dugsiyada (SLT), Kooxaha Maareynta Dugsiyada Ku-saleysan (SBMT), iyo daneeyayaasha ayaa soo saaray qorshayaal ah in ardayda aan ku kobceynin bay'adda ama qaabka waxbarashada fog ay marka hore dib ugu soo laabtaan barashadooda shaqsi ahaaneed. Kooxdan wajiga 1-aad waxaa ka mid ah dhammaanba ardayda lagu casuumay ee fasalada Pre-K ilaa 2-aad, kuwa fasalka 12aad ee Dugsi Sare, iyo Ardeyda Baahida Sare leh (ardayda wajahaya waqti adag ee barashada fog ee qeybaha sida: Imaatinka Xun (Poor Attendance), Aan gudbeynin (Not passing), Ardayda la tacaalaya barashada). Marka jadwalka waqtiga la ansixiyo, waxaa siyaabo kala duwan loogula socodsiin doonaa Waalidiinta iyo Daryeelayaasha.

Ka hor inta aysan u dirin ilmahooda dugsiga subax kasta, waalidiinta / dadka ardayda masuulka ka ah, waxaa laga codsanayaa inay sameeyaan Baaritaanka Caafimaadka Ardayga Maalinlaha ah ee foomka COVID, oo laga helo (waxaan soo dhigaynaa bogga internetka iyo sidoo kale nuqulo warqad ah oo dugsiga maalin walba u diri doona guriga), si ay u go'aamiyaan haddii ay ammaan u tahay in ilmahoodu ka qaybgalo dugsiga iyo in kale. Intaas waxaa sii dheer, waxaan ka codsaneynaa waalidiinta inay ka qaadaan heerkulka canugooda ka hor inta uusan guriga ka bixin maalin kasta.

HABKA OGEYSIINTA:

Maaddaama koox kasta loo aqoonsaday inay soo noqonayso inta lagu jiro wajiga hore ee waxbarashada shakhsi ahaaneed, waalidiinta waxaa lagu ogeysiin doonaa luuqaddooda koowaad iyada oo loo marsiinaayo websaydhka Degmadda, boostada iyo wicitaannada taleefanka ee dugsiga ilmahooda.

NIDAAMYADA NADIIFINTA/JEERMIS BAABI'INTA:

Jeermis -baab'inta waa inaysan carruurtu sameynin (tusaale, masaxaada, dhalooyinka lagu buufiyo miisaska)..

Nadiifinta iyo jeermis-baabi'intu ayaa la raad raaci doona laguna qori doona buuga gacanta ee nadaafadda.

Imaatinka Ardayda: Nadiifi oo jeermiska ka baabi'I meelihii ay isticmaaleen kooxixii maalinta iskuulka ka horeeyey.

Inta lagu jiro Maalinta Dugsiga - Nadiifi oo jeermiska ka baabi'i 3 jeer maalintii meelaha taabashada badan sida gacmo-qabshada albaabbada, wiishka, gacma-qabsiga jaranjarada, badhamada wiishka. Dhammaan shaqaaluhu waxay taageeri doonaan dadaallada nadaafadda, oo ay ku jiraan macallimiinta fasalka iyo kaaliyeyaasha macallimiinta illaa intii suurtagal ah.

Musqulaha waa la nadiifin doonaa jeermiskana waa laga baabi'in doonaa maalin kasta laba jeer.

DHARKA UNIFOOMKA IYO WEJI -DABOOLKA

Iyadoo la ilaalinayo sii wadida, sharciga unifoomka dugsiga ayaa waxaa loo fulin doona si khafiif ah. Ardayda dhigata iskuullada leh sharciga unifoomka ayaa laga filayaa inay u hoggaansamaan, hase yeeshee qoysaska la kulma dhibaatooyin adag waxay u baahan doonaan inay ku wargeliyaan maamulaha dugsiga in la baaro sida dugsigu u taageeri karo baahidooda si ay ula kulmaan waxa laga filaayo u hoggaansamida.

Marada daboolida wejiga (maaska) ayaa looga baahnaan doonaa Qaabka Barashada Qofka-Ahaaneed marka lagu sugan yahay dhismaha iskuulka degmada, howlaha gudiga iskuulka, la raacaayo baska ama gaadiidka kale ee la ansixiyay. Marada daboolida wajiga waa in laga sameeyaa ugu yaraan maro leh lakab laba jibbaar ah oo noqda mid si ku filan u wada daboola sanka iyo afka. Daboolida wajiga waa inaysan lahayn nooc walba oo dalool hawo qaadasho ah ama dalool lagu neefsado leh ama waji-gashi loo qaabeeyey sidii labis oo kale. Haddii ilmahaagu u baahan yahay maaska weji daboolka, fadlan la xiriir maamulaha ilmahaaga.

GACMO DHAQASHADA/RUGAHA JEERMIS BAABI'IYAHA GACMAHA

Gacmo-dhaqashada joogtada ah ayaa la dhiiri galin doonaa. Rugaha geermis baabi'iyaha/weelka lagu shubo jeermis dilaha ayaa laga heli doonaa meelaha socodka dadku ku badan yahay ee dugsiyada, oo ay ka mid yihiin fasallada. Haddii arday ka baxo qolka inta lagu jiro fasalka, waxaa laga filayaa inay gacmahooda dhaqaan ama isticmaalaan jeermis baabi'iyaha gacmaha, ka hor inta aysan ku noqon fasalka.

CUNOOYINKA / BIYAHA

Dhammaan ardayda waxay heli doonaan quraac iyo qado bilaash ah. Ardayda ka qeyb galeysa barashada shaqsi ahaaneed waxay cuntada ku cuni doonaan maqaayada, fasalka ama meel kale oo loogu talagalay, iyadoo lagu saleynayo hadba qorshooyinka u gaarka ah iskuulka. Biyaha la cabbo ayaa la heli doonaa marka laga codsado shaqaalaha adeegga cuntada iyo weelasha buuxinta dhalooyinka oo lagu rakibaayo dhammaan dugsiyada. Ardayda dooranaya Barashada Fog waxay sii wadi doonaan soo qaadashada cunnooyin kale duwan Isniin, Arbaco & Jimcaha laga bilaabo 11 subaxii - 1:00 duhurnimo.

AALADAHA

Arday kasta waxaa la siiyay aalad ay degmadu bixisay. Haddii ardaygu aanu haysan wax aalad ah, waalidku wuxuu la xiriiri karaa dugsiga ilmaha ama wuxuu booqan karaa Xarunta 'Center for Innovation, Technology and Training' oo ku taala 1515 South Park Avenue, Isniinta ilaa Jimcaha 10:00 subaxii – 4:00ta galabnimo. Waxbarashada shaqsi ahaaneed, macallimiinta ayaa iskooda u go'aamin doona goorta loo baahan yahay ardayda inay la yimaadaan qalabkooda; si kastaba ha noqotee, ardaydu waa inay qorsheeyaan inay u soo qaataan qalabkooda maalin walba dugsiga iyagoo isticmaalaya boorsada dhabarka ama boorsada dugsiga, dabka qalabkuna waa inuu buuxa. Macluumaadka faahfaahsan wuxuu ku jira Buug-gacmeedka Farsamada Ardayga oo ku saabsan daryeelka iyo mas'uuliyadda qalabka ardayda ayaa laga heli karaa https://www.buffaloschools.org/handbook.

MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Waalidiintu waxay cusbooneysiin karaan macluumaadka xiriirkooda iyagoo adeegsanaya foomka laga helo at https://www.buffaloschools.org/contact

KHADADKA TOOSKA AH

Khadka Caawinta BPS - 716-816-7100

ISKUULOJI 'SCHOOLOGY'

Dhammaan macallimiinta fasalada PK-12aad waxay isticmaali doonaan nidaamka maamulka waxbarashada (learning management system), Schoology, si loo fududeeyo gudbinta waxyaabaha. Macallimiintu waxay abuuri doonaan koorsooyin oo ay soo dhigi doonaan waxa koorsada ay ka kooban tahay 'Schoology', oo ay ku jiraan fiidiyowga iyo websaydhka iskuxirka (links), linkiyaasha shirarka, dukumiintiyada, PowerPoints, iyo casharrada 'Nearpod'. Ardaydu sidoo kale waxay awoodaan inay fariimahooda ku gudbiyaan Schoology. Fiidiyowyada iyo macluumaadka la xiriira ardayga iyo waalidka ee gelitaanka Schoology waxaa laga heli karaa halkan: https://www.buffaloschools.org/Page/88626.

Intaa waxaa sii dheer, meel kasta oo suurtagal ah, Degmadu waxay ku talo jirtaa inay ka faa'iideysato ilaha kale ee internetka sida nuqulada buugaagta dhijitaalka ah, barnaamijyada dheeriga ah sida 'Zearn' (xisaabta K-6), barnaamijyada internetka iyo barnaamijyada sida 'Lexia Core5' iyo 'PowerUp', 'myON', 'Moby Max Math / Science', 'Think Central Nearpod', 'Pearson Realize', iyo 'Castle Learning'. Ilahaan waxaa laga heli karaa iyada oo loo maro hal mariin kaliya in lagu galo; '**Clever**'. Linkiga 'Clever' sidoo kale waxaa lagu martigalin karaa 'Schoology'. Ardayda da'da yar waxay sidoo kale isticmaali karaan karaarka si ay ugu soo galaan Schoology.

GAADIIDKA

Adeegyo gaadiid ayaa la siin doonaa ardayda u qalanta qaab baska jaallaha ah ama kaarka baska dadweynaha ee NFTA. Ardayda waxaa looga baahan doonaa inay wajiga u dabooshaan qaab la aqbali karo marwalba. Waalidiinta waxaa laga filayaa inay siiyaan ilmahooda marada wajiga oo la dhaqi karo maalin walba. Tirada cadada baska ayaa la dhimi doonaa, ardayda waxaa laga yaabaa in loo qoondeeyo kuraas si kor loogu qaado kala fogaanshaha bulshada. Basaska oo dhan ayaa jeermiska laga dilaayaa maalin kasta iyada oo meelaha taabashada badan la nadiifinayo inta u dhexeysa safarada baska iskuullada. Ardaydu waxay soo qaadan karaan dhalo muggeedu ka yar yahay (in ka yar 8oz.) oonjeermis dilaha gacmaha ah. Kaararka baska ku meel gaarka ah lama isticmaali doono inta lagu jiro xilliga khalalaasaha COVID-19. Ardaydu waa inay ku qoran yihiin xaashida safarka loo qorsheeyay si ay u helaan adeegyada gaadiidka. Macluumaadka marinka gaadiidka ayaa boostada lagu diri doonaa. Waa muhiim in dugsiga cunugaaga uu haayo cinwaanka gurigaaga ee ugu daabeeyay iyo macluumaadka xiriirka.

QALABKA DUGSIGA

Waalidiintu waa inay ka eegaan websaydhka iskuulka ilmahooda ama ay la xiriiraan macallimiinta ilmahooda si ay u helaan liistada alaabada. Ardayda waxaa laga codsanayaa inay keenaan dhalooyinka biyaha dib loo isticmaali karo maalin kasta.

TALLAALKA, BAARITAANKA COVID IYO TALAALIDA

Waalidiinta waxaa lagu boorrinayaa inay hubiyaan diiwaanka talaalka caruurtooda si ay u ogaadaan in looga baahan yahay tallaalada la amray gelitaanka / kaqeybgalka dugsiga si ay u xaadiraan. Marka loo eego Waaxda Caafimaadka ee Gobolka New York (NYSDOH) Sharciga Dadweynaha 2164, Dhammaan ardayda BPS waxaa looga baahan yahay inay qaataan tallaalada da'da dugsiga ee qasabka ah ee sanad dugsiyeedka 2020-2021, oo ay ku jiraan ardayga si gaar ah uga qayb qaadanaya Barashada Fog ee guriga. Halka NYSDOH ay ka-dhaaftey illaa 2/9/21, waxaa si xoog leh lagula talinayaa in waalidiinta / daryeelayaashu ay ka faa’iidaystaan waqtigan si ay u hubiyaan in ilmahooda si habboon loo tallaalay. Intaa waxaa sii dheer, sida ay ku talisay Xarumaha Xakamaynta Cudurrada, habka ugu wanaagsan ee lagu xoojin karo awoodda cunuggaaga ee uu kula dagaallami karo fayrasyo iyo cudurrada dilaaga ah ay tahay hubinta cusboonaysiinta tallaalkooda.